

FAAFIN DEGDEG AH

Xiriirka:

Perry Cooper / Sarkaalka Sare ee Warbaahinta Dekedda Seattle

(206) 787-4923 / cooper.p@portseattle.org

\$600,000 Oo ay Heli karaan Mashaariicda Bii'ada ee Degmada South King

Shardiga cusub ee isku aadka dhan 2 :1 si loo yareeyo culeyska saaran deeq qaateyaasha

Kooxaha bulshadu hogaamiso ayaa hada codsan kara maalgalinta Dekada Seattle si loo horumariyo deegaanka xaafadaha u dhow Gagida Caalamiga ee Diyaaraha Tacoma-Seattle (SEA). Marka la bilaabo wareegga afraad ee Barnaamijka Deeqaha Bii'ada, ururada u adeegga bulshooyinka Burien, Des Moines, Federal Way, Normandy Park, SeaTac, iyo Tukwila ayaa codsan kara deeqda halka sano ah oo dhan \$20,000, ama maal gelinta sanadaha badan oo dhan ilaa \$60,000. Lacagta wadarta guud oo dhan 600,000 ayaa loo qoondeeyay wareegaan. Mashaariicda imaan kara waxaa kamid ah hormarinnaada aagaga dadwaynaha, rakibaada qalabka ama farshaxanka, ama mashruuca xaafada ama mashaariicda ilaalinta bii'ada ee deegaanadaan kamid ah Degmada South King. Mashaariixdu waa in lagu fuliyaa dhul dadwayne. Codsiyada waa in lasoo diraa ugu danbayn Isniinta, Oktoobar 30, 2023 markay saacadu tahay 1:00 pm.

“Barnaamijka Deeqaha Bii'ada ee Dekada ayaa gacan ka gaysanaaya buuxinta baahiyaha bulshadeena soo galootiga ah iyo dhalinta asagoo maal gelinaaya nashaadaadka banaanka ee soo celinta bii'ada iyo geedo beerista, samaynaaya barnaamijyada tababarka, gacanna ka gaysanaaya maal gelinta helitaanka adeegyada luuqada ee beerta raaxada iyo baahiyaha boorarka,” **ayuu yiri Armaye Eshete, Agaasimaha Fulinta ee, Serve Ethiopians of Washington.** “Waxaan nasiib u yeelanay inaan si dhow ula sahqeyno Dekada iyo Magaallada SeaTac si aan uga dhigno beeraheena raaxada kuwo la geli karo, badqab badan, caafimaad u leh cid kasta si ay ugu baashaasho.”.

“Iskaashiyada ku saleysan sinaanta ayaa xaqijinaaya in faa'iidooyinka dekada dadwaynaha ay gaaraan bulshooyinka maal gelinta loogu baahi badan yahay,” **ayuu yiri Gudoomiye Ku xigeenka Gudigu Toshiko Hasegawa.** “Deeqahaan bii'adu waxay saamayn qoto dheer ku leeyihiiin sinaanta sidoo kale. Waxay bulshada u horseedaan taageerista mashaariixda ay hogaamiyaasha maxaliga ah ay doonayaan inay muhiimada saaraan.”

Barnaamijka Deeqaha Bii'ada ee Sanduuqa Saamaynta Bulshada ee Degmada South King. Ayadoo la adeegsanaayo maal gelin iyo iskaashiyo lala sameeyo ururada bulshada, Barnaamijka Deeqaha Bii'ada ayaa faa'iidooyinka kasoo xarooda Dekada ku cesha mashaariicda kor u qaadaaya nolosha, hormarinaaya dhulka cagaaran, soona celinaaya kayamaha magaaloooyinka u dhow gegiga.

Bulshooyinka Degmada South King waxay waajahaan saameyn deegaan oo aan loo sineyn oo ay ugu wacan tahay sababo kaladuwan, oo ay ku jirto taariikhda fog ee dhaqamada isticmaalka dhulka aan is leekayn iyo baro-bixinta dhaqaale ee u riixday bulshooyinka jilicdasan koonfurta.

U doodeyaasha ayaa ku guuleystay xeerka isku aadka 2:1

Ilaa sanadka 2023, sharciga gobalka ayaa ka doonaayay in mashaariicda buulshada shardiga isku aadka 3:1 inay helaan maal gelinnada. Muddo dhawr sano ah Dekada ayaa soo jeedinaysay talo sharci oo lagu yareynaayo shardiga isku aadka 3:1 kaasoo ah muhiimad sharci oo wayn. Intii lagu jiray mareegta sharciga ee Gobalka Washington 2023, ayadoo taageero laga helaayo Xildhibaan Clyde Shavers iyo Xildhibaan Tina Orwall, iyo garab istaag ayka heleen Gudoomiyaha Dekada Seattle Hamdi Mohamed, Dekada ayaa si guul leh ugu dooday yareynta xeerka shardiga isku aadka maxaliga ah ee codsadeyaasha khayriga ah ayna qasab tahay in lagu baxsho SKCCIF lagana dhigo 2:1. Isbadelkaan ayaa yareynaaya culayska saaran iskaashatada deeqda la siiyay wuxuuna kor u qaadayaawooda Dekada ee qandaraas siinta ururada bulshada u adeegga, haayadaha khayriga ah, kooxaha, iyo ururada mutadawiciinta ah ee hormarinnada dadwayne ku samaynaaya aagaga u dhowdhow garoonka.

Dekadu waxay bixisa qaabab kaladuwan oo lagu daboolaayo shardigaan ana ku jiraan waqtiga mutadawacnimada, saacadaha la joogista ka qaybgaleyaasha munaasabadaha dadwaynaha, saacadaha waxbarashada, qiimaynta bii'ada nolosha oo dhan oo la siiyo geedaha la beeray, yareynta wasaqda kaarboonka, tabarucaadaha sadaqada ah, taakulooyinka iskaashatada mashruuca, iyo deeqaha kaashka ah.

Ururadu waxay codsan karaan ikhtiyaarada maalgelinta ee hal mar iyo kuwa mararka badan labadaba. Mashruucna aad uma yara. Shaqaalaha Dekada ayaa dhawaan martigeliyay kulamo macluu, aad oo siin doona caawimo farsamo si loo caawiyoo codsadaayaasha dhammaan mudada lagu jiray hawsha codsiga.

Raadi macluumaad dheeriya oo khuseeya hawsha codsiga, waxyaabaha laga duubay kulannada xog isdhafsiiga, agabka codsiga, iyo mashaariicda horey loogu deeqay:

<https://www.portseattle.org/programs/south-king-county-community-impact-fund-environmental-grants-program>

Sanduuqa Saamaynta Bulshada ee Degmada South King

Dekadu waxay asaastay [Sanduuqa Saamaynta Bulshada ee Degmada South King](#) ee 2019 si loo kordhiyo fursadaha bulshooyinka la dayacay, isir ahaan iyo dhaqaale ahaan kala duwan. SKCCIF waa hal qaab oo Dekadu uga shaqeyso hiigsigeeda soo-kabasho siman, deegaanka wanaagsan, iyo nolol tayo wakan leh. Maalgalinta waxay ku deeqi doontaa \$10 milyan inta dhaxaysa 2019 iyo 2024. In badan oo ka mida mashaariicdani waxay kordhiyaan caawimada codsiga shaqo ee bulshooyinka la dayacay iyo kuwa aan ku hadlin Ingiiriisiga, waxay u carbiyan barnaamijyada carbiska shaqo iyo xirfadaha bada, dhisida beeraha, nadiifiyan goobaha dadweynaha, oo kordhiyaan waxbarashada deegaanka.

Gudbi Codigaaga Deeqaha Deegaanka ugu danbayn Isniinta, Oktoobar 30, 2023 markay saacadu tahay 1:00 pm.